



Adeegyada Afcelinta Lacag La'aanta ah

ISBEDDELADA ADEEGYADA COVID-19 DARTEED

Isticmaalka adeegyada tarjumaadda ee tayada leh kaas oo muhiim u ah dadka aan lahayn aqoonta Ingiriiska ama ay ku yar tahay inta lagu jiro xaalada COVID-19.

Dadku waa inay isticmaalaan adeegyada tarjumidda marka la heli karo.

Baro wixii ku **saabsan COVID-19 iyo astaameheeda**

Waa maxay adeegyada tarjumida ee lacag la'aanta ahi?

Waxaa helli karaa Adeegyada Tarjumida ee Lacag la'aanta ah, haddii:

- Aad Australia joogto
- Aad haysato Kaarka Medicare; aadna
- Leedahay aqoon hoosaysa oo xirfadaha afka Ingiriiska

Sidee ayaan ku helli karaa Adeega Tarjumaada oo Lacag La'aana?

Adeegbixiyayaasha soo socda ayaa ku helli kara magacaaga adeega Afcelinta oo lacag la'aan:

- Kuwa ka shaqeeya caafimaadka gaarka ah
- Farmashiyayaasha
- Ururada aan dawliga ahayn
- Hay'adaha guryaha ijaara
- Masuuliyiinta dawlada hoose, sida golayaasha degmooyinka maxaliga ah
- Ururada ganacsiga; iyo
- Kuwa ka tirsan baarlamaanka.

Macluumaad intaas ka badan oo adeegyadaan, arag **halkaan**.

Adeegbixiyayaasha kor ku xusan ayaa daqiiqada yar gudahood kugu xiri kara, si ay u xaqiijiyaan inaad hesho macluumaad afkaaga ku qoran.

Turjumaano

Hay'ada Aqoonsiga Qaranka (National Accreditation Authority) ee qaabilsan turjumaanada qoraalka iyo Afceliyayaasha (NAATI) ayaa aqoonsan mutarjumiinta. Mutarjumiinta waxaa xira anshaxa shuruucda mihnadeed taas oo uga baahan iyaga:

- u tarjumida macluumaadka si sax ah oo daacad ah
- ilaalinta qarsoodiga
- lahaanshaha dhexdhexaadnimo ku salaysan xaqiiqda; waxna
- ku qabta mar walba hab mihnadeed.

Habka Adeega Tarjumidu waa bilaash waxaana la hawlgeliyaa mutarjumiinta ugu aqoon badan ee la heli karo. Codsiga mutarjum mucayina lama dhiiro geliyo sababtaan darteed.

FIS adeegyadee bixisaa?

- Ku tarjumid telefoon degdeg ah. Adeegani wuxuu wax ku ool u yahay tarjumida aan la qorshayn wuxuuna bixiyaa:
 - Waxaad heli kartaa in ka badan 3,000 turjubaan oo ku hadla 160 luqadood
 - Adeega tarjumidu waa lacag la'aan 24ta saacadood ee maalintii, 7da berri ee asbuuca
 - Ku xiritaan mutarjum dhowr daqiiqo gudahood.
- Ku tarjumida telefoon horay loo balansaday.
 - Waa wax ku ool afcelinta la qorsheeyey, haddii aad u baahan tahay inaad codsato luqadaha qaalibka ah.